




# PPS Waxay U Dabaaldegtaa Bisha Dhaxalka Isbaanishka / Laatiinka

Sebtembar 15, 2022

Qoysaska Qaaliga ah, Ardayda iyo Asxaabta Wada Shaqaynta,

Mid ka mid ah waayo-aragnimadayda aan ugu jeclahay xirfaddayda waxbarasho ee ku dhawaad soddon-sano waxay ahayd sannadkii ugu horreeyay ee aan wax baray. Wuxaan ahaa macalin Isbaanish ah oo laba luqoodle ah, waanan ku faraxsanay oo aan ku faanay in aan ahay "el maestro" - door xambaarsan qaddarin iyo ixtiraam xaafadda Laatiinka ee aan ku noolaa oo aan ka shaqeyay.



Hooyaday, sida qaxooti badan oo kale, waxay i gelisay muhiimada waxbarashada iyo in aan ka shaqeyyo sidii aan bulshada wax uga bedeli lahaa. Wuxaan nasiib u yeeshay in waayo-aragnimadayda dugsiga hoose ay ka buuxday xaqijin dhaqameed iyo luqadeed. Sidaas darteed macalin cusub ahaan, waxa ay sharaf ii ahayd in aan sidaas oo kale u sameeyo ardayda iyo qoysaskooda. Wuxaan tan iyo guud ahaan ururinta waayo-aragnimada nololeed ee aan leeyahay Laatiin ahaan, u keenaya hoggaankayga Dugsiyada Dadweynaha Portland.

Dhammaan ardayda waxay mudan yihiin in la xuso hidahooda iyo taariikhdooda taasoo qayb ka ah waayo-aragnimadooda waxbarasho. Kala duwanaanshaha jinsiyadeed, dhaqameed, iyo luqadeed ee bulshadeena ayaa hodmiya mid kasta oo naga mid ah, dadka waaweyn iyo carruurta si isku mid ah. Barashada ku saabsan kala duwanaanshiyaha hodanka ah waxay gacan ka geysan doontaa u diyaarinta ardaydeena inay hoggaamiyaan adduun sinnaan iyo bulsho ahaan cadaalad ku dhisan.

Maanta, waxaan bilaabeynaa dabaaldega Bisha Dhaxalka Isbaanishka/Laatiinka, taas oo bixisa fursad lagu sharfo, aqoonsado, oo loogu dabaaldego wax ku biirinta Laatiinka ee bulshadeena, gobolka, iyo dalka. Bisha soo socota, waxaad arki doontaa baraha bulshada qoraalo iyo warbixino ku saabsan dhacdooyinka degmada oo dhan si bulshadeena loogu wacyi geliyo looguna ogeysiyo xafadan iyo in la muujiyo taariikhda gaarka ah iyo wax ku biirinta Laatiinka ee Portland iyo guud ahaan dalkeena.

Si sharaf ah,

Guadalupe Guerrero  
Kormeeraha Guud ee Dugsiyada Dadweynaha Portland